Hadaad ku tiraado Saaxiibka: Aamus, Maalinta Jumcada, iyadoo Imaamku khudbaynaayo, Laqwi baad la timid

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Hadaad ku tiraado Saaxiibka: Aamus, Maalinta Jumcada, iyadoo Imaamku khudbaynaayo, Laqwi baad la timid".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey inay ka mid tahay aadaabta waajibka ku ah dadka Salaada Jumcada u yimid: inay dhagaystaan khadiibka dhagaystaan, si loogu tadaburo waanada iyo wacdiga, Qofka hadla wax yarba ha ahaatee isagoo Imaamkuna khudbaynaayo, ee ku dhaha cid kale: "Aamus ama dhagaysoS midkaasi wuxuu waayey fadligii salaadaJumcada.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3107